



Baaritaanka COVID-19 ee Guriga lagu Sameeyo

12/15/2020

Minnesota iyo Adeegyada Caafimaadka ee Vault Medical Services ayaa iska kaashanaaya si ay u baxiyaan baaritaanka aan shuruudo la'hayn, baaritaan candhuuf oo COVID-19 oo guriga la isaga qaadi karo oo loogu talagalay qof kasta oo ku nool Minnesota, halahaado astaamaha xanuunka ama yuusan lahaan. Ka codso baaritaan aad guriga ku samayn karto, oo bilaash ah: [Vault: Baaritaanka COVID ee ay Bilaashka Ku helayaan dhammaan Reer Minnesota \(https://learn.vaulthealth.com/state-of-minnesota/\)](https://learn.vaulthealth.com/state-of-minnesota/).

Haddii baaritaan aad isla markiiba u baahan tahay, halkan ka fiiri meel baaritaan toos ah aad ku tagi karo ee [Ka fiiri Goobaha Baaritaanka: https://mn.gov/covid19/get-tested/testing-locations/index.jsp](https://mn.gov/covid19/get-tested/testing-locations/index.jsp).

- Baaritaankaan candhuufta waa mid sax ah oona la mid ah baaritaanka dheecaanka sanko. Wuxuu barayaa inaad hadda qabto COVID-19 iyo inaad ku faafin karto dadka kale. Ma aha baaritaan kuu sheegaaya haddii aad horay u qabtay caabuqa COVID-19.
- Baaritaankaan candhuufta waxaa loo fidinnayaa dhammaan dadka reer Minnesota.
 - Haddii aad haysato caymis caafimaad, waxaad u baahnaa doontaa inaad keento xogtaada si markaa shirkada caymisku ay u bixiso qarashka baaritaanka. Haddii caymiskaagu aanu daboolayn baaritaanka COVID-19, ama uu san bixinayn qarashka oo dhan, dowladda ayaa bixinnaysa qarashka baaritaanka. Haddii aadan caymis haysan, dowladda ayaa bixinnaysa qarashka baaritaankaaga. Laguuma soo diri doono biil.
 - Bogga Vaulti ha gelin xogtaada kaarka daynta. Haddii xogtaan lagaa codsado, xir boggeenna oo mar kale iskuday. Si aad baaritaanka bilaashka ah u hesho, gal bogga adiga oo ka galaya xiriiriyaha (link) kore. Haddii lacag lagaa qaaday baaritaanka, iimeel u dir testathome.mdh@state.mn.us.
- Dadka qaangaarka iyo carruurta labaduba baaritaannadan way qaadan karaan. Da'da qaangaarka oo ah 18 ama kasi wayn waa inuu u codsadaa baaritaanka ilmo carruurta. Hadda, ciwaan iimeel oo u gaar ah ayaa looga baahan yahay qof kasta oo u baahan baaritaan.

- Baaritaanka candhuufta wuxuu noqon karaa mid ayna u sahlanaayn dadka ay ku adag tahay inay cansdhuuf soo saaraan, sida carruurta yaryar ama qof faalig ku dhacay.

Sida baaritaanka loo sameeyo

- Muddo 30 daqiiqo ka hor inta aaddan baaritaanka samayn waxba ha cunin, ha ruugin, ama ha cabin waxba (xataa biyo).
- Markaad diyaar u tahay inaad baaritaanka samayso, gal barta [the Vault virtual waiting room](https://app.vaulthealth.com/login?redirectUrl=https://app.vaulthealth.com/waiting-room&simple=true/) (<https://app.vaulthealth.com/login?redirectUrl=https://app.vaulthealth.com/waiting-room&simple=true/>) kadibna samee booqasho muuqaal ah oo aad la galayso horjooge dhanka baaritaanka ah oo ka socda Vault, kaasoo ku siin doona tilmaamo.
- Waxaad intaas kadib baaritaanka u diraysaa shaybaarka Vault oo ku yaala Minnesota ama New Jersey, adigoo adeegsanaya baakada lacagteeda horay loo baxiyay ee baaritaanka la socotay. Marka aysoo gaarto shaybaarka, natiijada baaritaankaaga waxaad ku helayaa iimeelka 24-48 saacadood gudahood.

Markaad baaritaanka samayso ka dib

- [Waa la I Baaray - Maxaa Xigga Hadda?](https://mn.gov/covid19/get-tested/i-got-tested-now-what/index.jsp) (<https://mn.gov/covid19/get-tested/i-got-tested-now-what/index.jsp>)
- [Waxa aad Samaynaos Intaad Sugayso Natiijada Baaritaanka COVID-19](https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/waiting.html) (<https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/waiting.html>)

Macluumaad dheeraad ah

- [Su'aalaha Inta badan la Isweydiiyo ee ku saabsan Baaritaanka COVID-19](https://mn.gov/covid19/get-tested/faq/index.jsp) (<https://mn.gov/covid19/get-tested/faq/index.jsp>).
- Dookhyada baaritaanka tooska ah, ee aan shardi ku xirnay: [Goobaha Baaritaanka Bulshada ee COVID-19](https://mn.gov/covid19/get-tested/testing-locations/community-testing.jsp): (<https://mn.gov/covid19/get-tested/testing-locations/community-testing.jsp>).
- Haddii aad su'aalo ka qabto baaritaanka candhuufta, fadlan iimeel u dir mn@vaulthealth.com ama wac 800-800-5698. Wakiil ka socda Vault ayaa wicitaanka ama iimeelka kaaga soo jawaabi doona sida ugu dhaqsaha badan ee suurto galka ah.
- Cilado kaa haysta helitaanka natiijooyinka baaritaanka ama cabashooyin ku aadan caymiska ama xatooyo/khiyaano: [Ma qabtaa Cabasho?](https://mn.gov/covid19/get-tested/feedback/index.jsp) (<https://mn.gov/covid19/get-tested/feedback/index.jsp>).
- Haddii aad u baahan tahay fududeynta loogu talagaloo naafanimada ama aad u baahan tahay adeegyada turjumaada, fadlan email u dir accessibility@vaulthealth.com.



Waaxda Caafimaadka Minnesota | health.mn.gov | 651-201-5000
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xiriir health.communications@state.mn.us si aad u weyddiisato qaab kale. (Somali)